



ismaamulka san diego

# sunta cayayaanka



## ***Aan Kuligeen Qaadano Doorkeena!***

Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnadeena biyaha. Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya in **ka badan 50% dadka** deegaanku ay aaminsan yihiin in wasaqda gasha balida, harooyinka, iyo xeebaha ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.

### ***Diyaar ayaan u nahay Inaan ku Caawino.***

Sunta cayayaanka ayaa si fudud u raaci kara biyaha roobka ama waraabka. Barnaamijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ka taageeraaya dadka deegaanka dedaaladooda kahortaga wasaqda biyaha asagoo siinaaya **tilmaamahaan muhiimka ah ee ka hortaga in sunta cayayaanku gasho biyaha daadka.**



**Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka raabka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN** kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, io badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

### ***Maxaad Samayn Kartaa Si aad U ilaaliso Nadaafada Biyaheena?***

- **Ku shub sunta cayayaanka marka jawigu qalalan yahay** aysana jirin dabayl badan.
- **Iska ilaali inaad ku daadiso waraha biyaha.**
- **Ugu shub sunta cayayaanka si waafaqsan tilmaamaha.**
- **Adeegso cadadka ugu yar sunta** adoo raacaaya tilmaamaha ku qoran.
- **Adeegso Farsamooyinka Isku Dhafan ee Maaraynta Cayayaanka (IPM)** si aad u xakamayso cayayaanka. IPM waxaa ku jira adeegsiga xasharaadka muhiimka ah, shabaq u dhigista iyo buufinta.
- **Ku xaree sunta cayayaanka qasacyo astaysan, oo xiran** una xaree qaab ka difaacaaya inay taabtaan biyaha daadka.
- **Isla markaba nadiifi waxyaabaha daata ee sunta cayayaanka** iyo si waafaqsan tilmaamaha ama tilmaamaha Xaashida Xog Badqabka (SDS).

***Waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.***

***Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah.***

**1-888-846-0800**

watersheds@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater